



Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/GD/00117/13

Taariikh: 21/02/2013

**Ku: Guddiyadda Qabanqaabada Maamulsameynta Gobollada
Jubbooyinka**

Fadhigooda

Ujeeddo: Codsi ka Soo Qaybgal Shir Wada Tashi

Mudanayaal iyo Marwooyin,

Anigoo Tixraacaya Dastuurka Ku-Meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya qodobkiisa 49aad. Anigoo sidoo kale tixraacaya go'aankii Golaha Wasiirada ee kusaabsanaa in dawladdu u fududeeyso gobollada dalka inay maamulkooda sameystaan. Anigoo tixgelinaya talo-bixintii wafdigii heer wasiiro ee booqaashada ku tegey gobollada Jubbooyinka. Anigoo garwaaqsan baahida deg degga ah ee loo qabo in dhammaan gobollada dalku ay sameystaan maamuladooda iyadoo la waafajinayo Dastuurka Dalka iyo qawaaniinta.

Waxaan casumaad u fidinyaa Guddiyadda Qabanqaabada Maamul Sameynta Gobollada Jubbooyinka inay ka soo qaybgalaan shir wada tashi oo lagu qaban doono magaalada Muqdisho, taariikhdu marka ay tahay 26ka Febraayo ilaa 1da Maarso, 2013. Ujeeddada shirkani waxay tahay in looga wada tashado qaabka ugu haboon ee maamul dhisidda gobollada Jubbooyinka.

Waxaan idiin soo gudbinayaa salaan xushmad badan, waxaan rajeynayaa inaad iga aqbali doontaa casuumadan. Waxaan ilaahay ka baryayaa inuu Soomaaliya ka dhigo mid ku waarta nabad, xasilooni iyo horumar.

Wada shaqayn wacan

Cabdi Faarax Shirdoon
Ra'iisul Wasaaraha JFS



Og. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka
AMISON Head of Mission
IGAD Representative in Somalia
UN Political Office in Somalia

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho